

## Sida loola soo xiriiro CCTRC

Cinwaanka boostada:

**Office of Ombudsman for Mental Health and Developmental Disabilities  
(Xafiiska Sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka)**

121 7th Place East

Metro Square Building, Suite 420

Saint Paul, MN 55101-2117

Toll free: **1-800-657-3506**

Cod: **651-757-1800**

Laliska MN Relay Service: **711**

Fakis: **651-797-1950**

Email: [ombudsman.mhdd@state.mn.us](mailto:ombudsman.mhdd@state.mn.us)

### **Macluumaad ku saabsan Xafiiska Sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka**

Sanadkii 1987, Sharci dejinta ayaa waxay abuureen Xafiiska sarkaalka baara cabashada shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka, oo ah hay'ad dawladeed oo madax banaan:

“Dhiirrigelinta heerarka ugu sarreeya ee la heli karo ee daawaynta, kartida, hufnaanta iyo caddaalada loogu talagalay dadka qaata adeegyada cudurrada dhimirka, naafonimada korriinka, ku tiirsanaanta kiimikada ama khalkhalka shucuureed ee carruurta.”



Dukumiintigan waxaa lagu heli karaa qaabab kale oo loogu talagalay shakhsiyaadka naafada ah iyadoo la adeegsanayo macluumaadka xiriirka kor ku xusan.



**XAFIISKA SARKAALKA BAARA  
CABASHADA SHACABKA  
EE CAAFIMAADKA DHIMIRKA IYO  
NAAFONIMADA KORRIINKA**

“Cod Siinta Kuwa Marar Dhif ah uun La Maqlo”

Dib loo eegay July 2018



**XUKMINTA DAAWAYNTA  
MADANIGA AH XARUNTA  
TABABARKA IYO  
KHAYRAADKA (CCTRC)**

## Wax ku saabsan Xarunta Tababarka iyo Khayraadka

Xarunta Tababarka iyo Xukminta Daawaynta Madaniga ah (CCTRC) waa qayb ka mid ah Xafiiska Sarkaalka Baara Cabashada Shacabka ee Caafimaadka Dhimirka iyo Naafonimada Korriinka. CCTRC waxaa loo sameeyay inay caawiso dadka doonaya tababarka iyo macluumaadka la xiriira Sharciga Xukminta Daawaynta iyo Daawaynta Madaniga ah ee Minnesota iyo sharciga la xiriira. In kasta oo OMHDD ay bixiso macluumaad ku saabsan hannaanka xukminta daawaynta madaniga ah haddana hay'adu ma bixiso adeegyo sharci mana kugula talinayso bixiyeyaal adeegyada sharciga ah oo cayiman.

## Yay tahay in ay soo wacaan CCTRC?

CCTRC waxay caawin kartaa qofkasta oo raba macluumaad kusaabsan macluumaadka la xiriira Sharciga Xukminta Daawaynta Madaniga ah ee Minnesota iyo sharciga la xiriira. Shaqaaluhu waxay ku siin karaan macluumaad waxayna ka jawaabi karaan su'aalaha la xiriira habka xukminta daawaynta madaniga ah iyo su'aalaha la xiriira.

## Gudbinta

Mararka qaar, CCTRC waxaa laga yaabaa inaysan awoodin inay caawiso qofka soo wacaya. CCTRC waxay markaa siisaa u gudbinta hay'adaha, waaxaha iyo ilaha kale ee si fiican u caawin kara qofka soo wacay.

## U doodis iyo Taageero

Qaar ka mid ah dadka soo wacaya CCTRC ayaa laga yaabaa inay u baahanyihiin gargaar dheeraad ah. Haddii qofka soo wactamayaa uu buuxinayo qeexitaanka hay'ada ee macmiilka, CCTRC waxay qofka soo wacaya u gudbin kartaa shaqaalaha sarkaalka baara cabashada shacabka, oo bixin kara adeegyada taageero dheeraad ah.

Macmiilku waa qof ay u adeegto hay'ad, xarun ama barnaamij, oo qaata adeegyo ama daawayn loogu talagalay cudurrada dhimirka, naafonimada korriinka, ku tiirsanaanta kiimikada ama khalkhalka shucuurta.



## Tababar shakhsi ahaaneed

CCTRC waxay ku siin kartaa tababar gaar ah/bandhigyo ku saabsan mowduucyada ku saabsan xukminta daawaynta madaniga ah, oo ay ku jiraan arrimaha codsiga kahor (pre-petition issues), arrimaha codsashada ka dib, dawooyinka neerfaha iyo hababka u doodista wax ku oolka ah. Tababarku waa bilaash waxaana loo qaabayn karaa dhagaystayaashaada gaarka ah. CCTRC waxay tababartay macaamiisha iyo xubnaha qoyskooda, shaqaalaha bulshada ee degmada, xirfadlayaasha caafimaadka, saraakiisha fulinta sharciga, qareenada, bixiyeyasha daryeelka caafimaadka, shaqaalaha maxkamada iyo kuwa kale oo badan.

Haddii hay'adaada, ururkaaga ama kooxdaadu ay doonayaan tababar shaqsiyeed, fadlan la soo xiriir CCTRC.

## Macluumaadka Websaydka

CCTRC waxay haysaa websayd ballaaran oo ay ku jiraan macluumaad ku saabsan Sharciga Xukminta Daawaynta Madaniga ah. Waxaa jira xaashiyaha xaqiiqada oo ku saabsan habka xukminta daawaynta, amarada haynta xaaladaha degdega ah, wakiilnimada iyo qareenimada wax ku oolka ah iyo maamulida dawooyinka neerfaha.

Ogaysiiska in codsiga baaritaanka hore loo baahanyahay in loo sameeyo bukaanka la soo jeediyay ayaa sidoo kale ku jira websaydka. Kuwan waxaa laga soo daabacankaraa websaydka hadba sidii loogu baahdo.

Soo koobidda isbeddelada sharciyeed ee lagu sameeyey Sharciga Xukminta Daawaynta Madaniga ah iyo Daawaynta ee Minnesota ayaa sidoo kale lagu soo dhejiyey websaydka.

Dhammaan macluumaadka dib ayaa loo eegaa ugu yaraan sanadkiiba mar waana la cusbooneysiisaa hadba sida loogu baahdo.

Fadlan booqo websaydka wixii macluumaad dheeraad ah:  
<http://mn.gov/omhdd/commitment/>